

# I MACLUUMAAD LOOGU TALAGALAY DADKA NABADGALYADA CAALAMIGA AH KA DALBANAAYA CROATIA

SO

RH MUP

UNHCR
The UN Refugee Agency

hpc
hrvatski pravni centar



## Waa maxay nooca nabadgalyada caalamiga ah ee ay Croatia i siin karto?

Haddii aad joogto Croatia, aadna u baahan tahay nabadgalyo sababo la xariira inaad – ama aad ka baqeyso – in dalkaaga lagu xukumo, waxaa laga yaabaa in lagu siiyo magangalyo. Kan waxaa kujira xukun lagugu ridi karo sababo la xariira inaad ka tirsan tahay qowmiyad gaar ah, diin, koox jinsiyad (tusaale, inaad katirsan tahay LGBTQI+, qof qaba naafonimo, inaad ka badbaaday xadgudub jireed, iwm.), ama inaad qabto fikir siyaasad oo gaar ah. Haddii aadan buuxin shuruudaha magangalyada, wali waxaa lagu siin karaa ‘magangalyo kumeel gaar ah’ haddii aadan dalkaaga ku laaban karin sababo la xariira in lagu dili doono, lagaa saari doono dadka, lagu jirdili doono, laguula dhaqmi doono si xun ama laguu geysan doono xadgudub ama ciqaab, ama haddii nolashaada halis wayn ku jirto sababo la xariira inay jiraan oo wata rabshado oo ay qayb ka yihiin koox hubeysan.



**Haddii xaalada xun ee dhaqaale ama shaqo la’aan aysan ahayn sababaha aad u dalbaneyso magangalyada caalamiga ah.**



## Waa maxay waxa koowaad ee aan sameynaayo? U sheeg waaxaha maamulka inaad dooneyso inaad codsato magangalyo.

- Codsi nabadgalyo caalami ah isla markiiba, ama sida ugu dhaqsaha badan ee macquulka ah, isla marka aad soo gasho Croatia. Tusaale, waxaad ku codsan kartaa xaduuda, xarunta booliska ama askariga koowaad ee aad aragto, ama haddii aad ku xiran tahay 'Xarunta lagu xiro dadka Shisheeyaha ah.'
- Waxaad codsan kartaa magangalyo caalami ah haddii lagu qabto adoo si aan sharci ahayn oga soo gudbaaya xaduuda Croatia ama si aan sharci ahayn ku jooga Croatia.
- Mar walba oo ay wareysi kaa qaadayaan boolis, waxaad xaq u leedahay inaad hesho turjumaan, oo caadi kuugu imaan kara ama taleefoonka kugula hadli kara: haka meermeerin inaad codsato.
- Si cad u sheeg inaad u baahan tahay magangalyo caalami ah, aadna ka baqeyso inaad dib ugu laabato dalkaaga, iyo in lagugu xukumay dalkaaga ama nolashaadu halis ku jirto. Sidoo kale xogtaan meel ayaad ku qori kartaa, kadib saxiix oo u dhiib warqada askari boolis ah. Luuqada aad rabto ayaad ku qori kartaa.
- Haddii aad ka yar tahay 18 sano aadna kaligaa timaaday Croatia, waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad isla markiiba u sheegto sargaal boolis ah (haddii aad joogto xuduuda ama saldhig boolis) ama meel kale oo caalami ah (tusaale, haddii aad joogto xarun xabsi ah, 'kormeerahaaga,' ama shaqaalaha kiiskaaga), si laguugu magacaabo gaar ah oo masuul kaa noqdo. Qofka gaarka ah ee masuulka kaa ah wuxuu ilaalin doonaa xuquuqahaaga inta lagu jiro dhageysi dacwad oo kasta.
- Haddii aad Croatia kusoo gashay dukumiinti been ah ama dukumiinti uu leeyahay qof kale, si cad u sheeg oo sharax sababta. Tani ma ahan sabab lagu helo magangalyada caalamiga ah. Haddii aad haysato dukumiintigaaga gaarka ah, tus.
- Haddii laguu gudbiyo maxkamad, ku celi inaad dalbanayso magangalyo caalami ah oo codso in lagu qoro diiwaanada maxkamada.

- Kadib marka aad sheegto inaad u baahan tahay magangalyo, waxaa lagaa qaadi doonaa faro, haddii aad ka wayn tahay 14 sano ama kasii wayn tahay, waxaana sidoo kale lagaa qaadi doonaa sawir. Waxaa la qaban doonaa waqti kama dambeys ah, oo aad ku xirnaan doonto Xarunta Soo dhaweynta inta aad codsanayso Magangalyada caalamiga ah. Xarumahaan waxay hadda ku yaalaan Zagreb (oo badanaa loo yaqaan 'Porin') iyo Kutina.
- Haddii aad magangalyada caalamiga ah ku codsato gudaha xabsia Ježevo, Tovarnik ama Trilj, la xariir 'kormeerahaaga'. Sida kor lagu xusay, sidoo kale waxaad warqad ku qori kartaa inaad dalbaneyso magangalyo, waxaadna ku qori kartaa luuqada aad dooneyso.
- Sarkaal boolis waa inuu kusii macluumaad qoraal ah oo ah habraacyada lagu codsado magangalyada caalamiga ah. Haddii arrintaan aysan caddeyn, waxaad waydiin kartaa su'aalo, ama waxaad la xariiri kartaa urur ay ka go'an tahay inay caawiyaan dadka magangalyo doonka ah, oo sidoo kale loo yaqaan dadka magangalyada doonaaya. Meelaha lagala xariiri karo waxay ku qoran yihiin dhammaadka dukumiintigaan.

## Maxaa Xigga? Waxaad buuxineysaa codsiga magangalyo doonka.

- Kadib marka lagaa qoro Xarunta Soo dhaweynta Codsadayaasha ee loogu talagalay magangalyo doonka, waxaa lagugu casuumi doonaa wareysi uu kaa qaadi doono sarkaal ka socda Waaxda Arrimaha Gudaha Croatia ('MUP,' ka Croatian), asagoo uu joogo turjumaan. Inta lagu jiro wareysigaan, waxaa la diiwaangelin doonaa codsigaaga magangalyo doonka. Waxaad codsigaaga u gudbinaysaa qaab hadal ah: kaliya marxalado gaar ah haddii ay jiraan ayaa la aqbali karaa qoraal.
- Haddii ay macquul tahay, si loo xaqiijiyo inaad ku qanacsan tahay soo bandhigida macluumaadka codsigaaga, sarkaalka iyo turjumaanka waxay noqon doonaan isku jinsi. Haddii aysan

macquul ahayn, laakiin adiga muhiim kuu tahay arrintaas, waxaad walaacaaga ku gudbin kartaa Waaxda.

- Sarkaalka Waaxda Arrimaha Gudaha wuxuu kaa codsan doonaa inaad qorto xogtaada shaqsi; wadada aad soo martay markaad imaanaysay Croatia, iyo inaad sharaxdo sababaha aad u codsanayso magangalyada. Haddii wax uun kamid ah su'aalaha aysan caddeyn, waa caadi waa inaad ka codsato sarkaalka wareysiga kaa qaadaaya inuu si fiican u qeexo.
- Waa muhiim inaad bixiso xog shaqsi oo sax ah, ood u qeexeyso sida ugu fiican ee aad awoodo adoo sheegaya dhammaan sababaha keenay inaad dalkaaga kasoo tagto aadna magangalyo ka codsato Croatia. Bixinta xog been ah ama aan saxneyn waxaa ka dhalan kara in codsigaaga la diido.
- Sheeg dhammaan dukumiintiga muhiimka ah ee aad haysato. Haddii aadan haysan wax dukumiinti ah, sharax sababta. Arrintaan waa inaysan saameyn codsigaaga, maadaama dad badan ay dukumiintigooda kasoo tagaan marka ay soo duulayaan.
- Haddii, marka laga imaado inaad ka baqeyso xukun, ay jiraan sababo dheeraad ah oo keenaya inaadan ku laaban dalkaaga, sidoo kale sheeg sababahaas inta wareysigu socdo.
- Kadib marka aad gudbiso codsigaaga, Waaxda Arrimaha Gudaha ayaa xaqiijin doonta in Croatia masuul ka tahay go'aan ka gaarista codsigaaga iyo inkale, sida ku xusan Xeerka Dublin.
- Haddii la go'aamiyo in Croatia masuul ka tahay kiiskaaga, waxaad u baahan doontaa inaad sugto ilaa lix billood in go'aan laga gaaro kiiskaaga, oo laga bilaabaayo taariikhda la oggaaday in Croatia masuul ka tahay kiiskaaga.
- Haddii go'aan aan la gaari karin lix billood gudahood, waxaa lagula socod siin doonaa waqtiga dheeraadka ah oo go'aanka looga gaaraayo kiiskaaga. Waqtiga ugu badan ee go'aanku qaadan karo waa 21 billood sida ku xusan sharciga Croatia iyo kan Yurub.
- Go'aanku wuxuu noqon karaa mid wanaagsan (ood ku helayso maganhalyo ama magangalyo kumeel gaar ah) ama mid xun (lagu diidaayo kiiskaaga ama lagu diidaayo codsigaaga magangalyo doonisya).

## Waa maxay xeerka Dublin? Waxaa lagu oggaadaa dalka Yurub ka tirsan ee go’aanka ka gaaraya codsigaaga.

Qaar kamid ah kiisaska, dal kale oo ku yaala Yurub, ama Iceland, Lichtenstein, Norway ama Switzerland ayaa masuul ka noqon kara qiimeynta codsigaaga magangalyo doonka, ama Croatia:

- haddii aad tahay ilmo aan lala socon ama oo leh xub qoys (tusaale ahaan, waalid, wiil walaal/gabar walaal ah, eedo/adeer, awoowe/ayeeyo) oo degan mid uun kamid ah dalalka kor lagu xusay;
- haddii aad tahay qof wayn oo haysta xubin qoys (tusaale ahaan, nin/xaas, iyo qaar kamid dalalka kale, lamaane ama ilmo yar oo aan guursan) oo degan mid kamid ah dalalka kor lagu xusay, lana oggaado inay horey oga tirsan yihiin qoyskaaga marka aad kasoo tagtay dalkaaga saxda ahaa;
- haddii aad haysato oggolaansho shaqo ama fiiso ay bixiyeen mid kamid ah dalalka kor lagu xusay;
- haddii aad horey oga codsatay magangalyo caalami ah mid kamid ah dalalka kor lagu xusay (waa la oggaan karaa haddii lagaa qaaday faro);
- haddii aadan codsan magangalyo caalami ah laakiin lagaa qaaday faro intaad sida sharci darada ah kusoo maraysay mid kamid ah dalalka kor ku xusan,
- haddii la helo caddeyn kale oo muujinaysa inaad deganeyd ama soo dhexmartay gudaha mid kamid ah dalalkaas, xataa haddii aan meeshaas lagaaga qaadin far.

Haddii la oggaado in Croatia aysan masuul ka ahayn codsigaaga, waxaa lasoo saari doonaa go’aan qoraal ah, waxaa laguu gudbin doonaa dalka la oggaado inay masuul kaa yihiin. Hawshaan muddo ayay qaadan kartaa: fadlan dulqaado.



**Haddii xubin qoyskaaga katirsan joogo Dal kamid ah Yurub, waxaad codsan kartaa inaad midowdaan. Midoobida qoyska muddo ayay qaadan kartaa, marka dulqaado.**

## Maxaa dhacaaya kadib wareysiga codsigayga? Waxaa la qaban doonaa wareysi labaad waxaana laga soo saari doonaa go’aan.

- Haddii la oggaado in Croatia ay masuul ka tahay codsigaaga, sida ku xusan sharciyada Dublin ee kor lagu qeexay, waxaa lagugu casuumi doonaa wareysi muhiim ah.
- Sarkaal ‘MUP’ ah oo kale ayaa dhageysan doonaa sheekadaada xabsiga, asagoo uu mar labaad joogo turjumaan.
- Haddii ay macquul tahay, si loo xaqiijiyo inaad qanacsan tahay inta lagu jiro wareysiga, sarkaalka iyo turjumaanka waxay noqon doonaan isku jinsi. Haddii aysan macquul ahayn, laakiin adiga muhiim kuu tahay arrintaas, waxaad walaacaaga ku gudbin kartaa Waaxda.
- Waa inaad si toos ah oga qaybgasho wareysiga, haddii aad haysato ama aadan haysan wakiil sharci.
- Haddii aad haysato wakiil sharci, sidoo kale wuxuu xaadiri doonaa wareysiga.
- Wareysigu wuxuu socon doonaa dhowr saacadood.
- Bayaankaaga waa la duubi doonaa ayadoo la adeegsanaayo aaladaha maqal-muuqaalka ah. Muddo hore ayaa lagula socodsiin doonaa arrintaan.
- Qaar kamid ah codsadayaasha waxaa laga yaabaa in lagu casuumo wareysi dheeraad ah, saddexaad.



## Maxay tahay inaan ka oggaado wareysiga? Waa inaad bixiso dhammaan macluumaadka muhiimka ah waana inaad sheegto runta.

- Billoowga wareysiga, sarkaalku wuxuu kuu sharixi doonaa habraaca wareysigaaga.
- Sarkaalku wuxuu ku waydiin doonaa su'aalo ku saabsan waxa dhacay ama waxa ka dhacaaya dalkaaga, wuxuuna ku waydiin doonaa su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan xogta aad bixisay inta lagu jiray wareysiga koowaad ee qaybta ka ah codsigaaga magangalyo doonka.
- Waa inaad sheegto wax kasta oo muhiim ah iyo xogaha la xariira codsigaaga, oo ay kujiraan sababta aad dalkaaga oga soo tagtay, sida laguu xukumay, iyo cidda ku xukuntay.
- Wax walba ood sheegto, oo ay kujiraan xogtaada gaarka ah, waxaa laga dhigi doonaa kuwo qarsoon. Qofna lalama wadaagi doono, oo ay kujiraan maamulayaasha dalkaaga asalka ah.
- Haddii aadan xasuusan karin qaar kamid ah macluumaadka, sida taariikhaha gaarka ah ama goobaha, haka welwelin. Sheeg runta, oo ha bixin macluumaad aan sax ahayn. Waa caadi inaad sheegto inaadan sharixi karin, ama aadan hubin.
- Haddii aad awoodo, wareysiga usoo qaado dukumiinti kasta oo muujinaaya inaad dhibaato la kulantay ama aad ka cabsatay in dalkaaga lagugu xukumo, oo gacanta kusoo qaado nuqulo aad ka bixisay. Tusaale ahaan, u yeerida booliiska, xukunada, waraaqaha hanjabaada ah, caddaynta xadhiga, shahaadooyinka caafimaadka, jarjarida wargeysyada, sawiro, iwm.
- Haddii aadan haysan dukumiinti aad ku caddeyneyso aqoonsigaaga, ama haddii aad isticmaashay dukumiintiga qof kale inta safarkaaga kusoo jirtay, sharax sababta. Sarkaalku wuxuu eegi doonaa dhammaan dukumiintiyada aad haysato.
- Haddii ay jiraan wax uun aadan fahansaneyn, haka meermeerin inaad codsato qeexitaano dheeraad ah.
- Haddii aad dareemeyso daal ama shucuur, haka meermeerin inaad codsato fasax gaaban inta wareysigu socdo.
- Waxaa laga yaabaa in lagu waydiiyo su'aalo ku adkaada, ama xataa jawaabo aan habbooneyn. Waxaad sarkaalka u sheegi kartaa inaadan caadi dareemeyn oo aadan ka jawaabi karin su'aal, hase

yeeshee, maskaxda ku haay in ka jawaabista su'aalahaas inay ka caawin doonaan sarkaalka inuu gaaro go'aano ku aadan codsigaaga. Dhammaan xogtu waxay noqon doontaa mid qarsoodi ah.

- Qiimeynada caafimaadka ayaa sidoo kale la sameyn doonaa, marka la helo oggolaanshahaaga, si loo eego calaamado muujinaaya xadgudubyo ama waxyeello horey laguugu geystay.
- Haddii aysan macquul ahayn in la oggaado aqoonsigaaga ama dalkaaga saxda ah, sidoo kale waxaa lagugu sameyn karaa baaritaan, uu kamid yahay in la baaro taleefoonkaaga gacanta ama kumbuyuutarkaaga.
- Gabagabada, sarkaalku wuxuu kuu akhrin doonaa qoraalada wareysiga, asagoo caawimaad ka helaaya turjumaan. Haddii aad oggaato in wax aan loo qorin si sax ah, ama laga saaray xogtaada, u sheeg sarkaalka isla markiiba, markaas asaga ama ayada ayaa sixi doonta. Waxaa markaas kadib lagaa codsan doonaa inaad saxiixdo qoraalada. Marka aad saxiixdo qoraalkaas, waxaa loo tixgelin doonaa inay si sax ah oga turjumayaan waxa aad ku sheegtay wareysiga.
- Haddii aad u maleyneyso in turjumaanku uusan si sax ah kaaga turjumeyn waxa aad sheegeyso, ama aadan ku qanacsaneyn habka sarkaalku kaaga qaadaayo wareysiga, haka meermeerin inaad muujiso waxa aad dareemeyso, oo ay kujiraan inaad dalbato turjumaan kale ama sarkaal kale. Suurtagalnimadaan waa inaan la sameyn sabab la'aan.
- Haddii aad xanuunsan tahay, ama haddii aad iska ilaalisay inaad ka qaybgasho wareysiga adoo u maraaya sababo kale oo aan cududaar lahayn, waa inaad isla markiiba u sheegto sarkaalka 'MUP' ee kiiskaaga u xilsaaran, ee lagu xusay warqadaada casuumaada wareysiga. Haddii aadan cudurdaar haysan oo aadan caddeyn maqnaanshahaada 2 maalmood gudahood laga bilaabo wakhtiga wareysiga ee hore loo qorsheeyay, shaqada waa la joojin doonaa, taas oo macnaheedu tahay inaad waayi doonto dhammaan xuquuqda aad u leedahay codsiga magangalyada caalamiga ah.



**Waa muhiim inaad sheegto runta, aadna xaqiijiso kala hadalka bayaankaaga oo aad u sharaxdo si faahfaahsan, sida ugu macquulsan ee aad awoodom sababta aad dalkaaga oga soo tagtay.**

## Xaq ma u leeyahay kaalmada sharci? Haa.

- Marka aad muujiso inaad dooneyso magangalyo caalami ah, sarkaalka wareysiga kaa qaadaya waxaa masuul ka saaran inuu ku siiyo macluumaadka habraaca. Sidoo kale waxaa lagu siin doonaa macluumaad faahfaahsan inta lagu jiro wareysiga koowaad, ood u adeegsan doonto codsigaaga magangalyo doonka.
- Dhammaan codsadayaashu waxay xaq u leeyihiin inay helaan macluumaadka sharciga ee ku saabsan kiiskooda, tusaale ahaan halka ay ka taagan yihiin habraaca kiiska. Waxaad tan ka codsan kartaa sarkaalka 'MUP' inta hawshu socoto.
- Sidoo kale waxaad la xariiri kartaa qareenkaaga waqti kasta oo kiisku socdo, adoo dakhligaag isticmaalaya.
- Codsigaaga waa la aqbali karaa, la diidi karaa ama waa la joojin karaa. Haddii codsigaaga la diido, waxaad xaq u leedahay kaalmo sharci oo bilaash ah ood racfaan ugu gudbineyso Maxkamada Maamulka. Haddii codsigaaga la joojiyo, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto kaalmod sharci oo bilaash ah. Sarkaalka 'MUP' ayaa kusiin doonaa macluumaad ku saabsan xuquuqahaaga marka go'aan kiiskaaga laga gaaro.
- Liiska qareenada bixiya kaalmada sharci ee bilaashka ah waxaa lala wadaagi doonaa go'aan kasta oo diidmo ah oo laga soo saaro codsigaaga.
- Sidoo kale taageerada uu gobolku maalgelinta ku bixiyo, waxaa jira hay'ado aan dawli ahayn (NGO-yo) kuwaas oo bixin kara macluumaad sharci ama tallo inta lagu jiro hawsha kiiska, sida Xarunta Sharciga Croatian *(Hrvatski pravni centar)*, oo meelaha lagala xariiri hoos ku qoran yihiin.



## Ma leeyahay xuquuq iyo waajibaad kasya oo kale inta aan sugaayo go'aanka codsigayga magangalyada caalamiga ah? Haa.

- Haddii aad saa'id u xanuunsan tahay, waxaad xaq u leedahay kaalmo caafimaad. Carruurtu waxay xaq u leeyihiin waxbarashada dugsiga hoose iyo tan sare. Waxaad xaq u leedahay inaad ku dhaqanto diintaada waase, haddii aad sidaas sameyso, aadan carqaladayn badqabka dadka kale.
- Waxaad xaq u leedahay inaad shaqeyso saddex billood ka dib markaad soo gudbiso codsigaaga magangalyo doonka, haddii Wasaarada Arrimaha Gudaha aysan go'aan ka gaarin codsigaaga waqtigaas. Tani waxay khusaysaa keliya haddii daahitaanka go'aan gaarista aan loo nisbayn karin hab dhaqankaaga.
- Waxaad xaq u leedahay inaad ku dhex socoto dalka Croatia.
- Waa inaad saraakiisha u sheegto haddii aad badesho ciwaankaaga labo maalmood gudahood.
- Waa inaad u hoggaansantaa sharciyada Croatia, iyo sidoo kale sharciyada guriga ee Xarunta Soo dhowaynta, waana inaad la shaqeyso saraakiisha.



**Ka codso sarkaal inuu kusiiyo xog faahfaahan oo ku saabsan xuquuqahaaga.**

## Halkee joogataa inta aan sugaayo go'aanka codsigayga? Xarunta Soo dhaweynta ee loogu talagalay Codsadayaasha codsanaaya Magangalyo Doonka.

- Waxa lagu siin doonaa hoy bilaash ah ood ka helayso Xarunta Soo dhawaynta Codsadayaasha codsanaaya magangalyo doonka, iyo sidoo kale saddex cunto maalintii, agabka nadaafadda shakhsi

iyo gunno yar. Haddii ay muhiim tahay, sidoo kale waxaad awoodi doontaa inaad hesho kabo iyo dhar. Waxaa jira labo xarumood oo ku yaala Zagreb (oo badanaa loo yaqaan 'Porin') iyo Kutina.

- Xarunta Soo dhaweynta, waxaad dad wadaagi kartaan dad aad isku jinsi tihiin. Haddii aad qoyskaaga la timaaday, isku meel ayaa la idin dejin doonaa.
- Waa inaad xushmeyso dadka kale, aadna raacdo 'sharciyada guriga' iyo tilmaamaha lagugu siiyo Xarunta Soo dhaweynta.
- Inta lagu jiro saacadaha habbeenkii ee lagu dejiyay 'sharciyada guriga,' waa inaad joogtaa gudaha Xarunta Soo dhowaynta, ilaa sarkaal 'MUP' ah uusan oggolaan maqnaanshahaada.
- Haddii aad dooneyso inaad ka baxdo Xarunta Soo dhaweynta, waa inaad u sheegto sarkaalka 'MUP' ka.
- Haddii aad haysato maalgelino, waa inaad dabooshaa kharashaadka hoygaaga Xarunta Soo dhowaynta ama aad raadsato oggolaansho rasmi ah si aad u degto hoy gaar ah oo ka baxsan xarunta Soo dhowaynta.
- Haddii aad degan tahay hooy gaar ah, xaqiiji inaad wicitaano iyo boostiyo ku heli karto ciwaankaan oo ka socda 'MUP' (ku qor magacaaga iyo naynaastaada qataarka albaabka iyo boostada). Haddii aadan awoodin inaad ka hesho ogaysiisyo rasmiga ah maamulka, waxaa loo qaadan karaa inaad ka tagtay Croatia, waxaana laga yaabaa in codsigaaga magangalyo doonka ah la xiro.



**Codsade magangalyo caalami ah ka ahaan, waxaad xaq u leedahay inaad joogto aadna si xor ah ugu dhex socoto Croatia. Hase yeeshee, haddii aad degan tahay Xarunta Soo dhoweynta, waa inaad raacdo 'sharciyada guriga.' Ha ka tagin Croatia inta lagu guda jiro hawsha magangalyada caalamiga ah sababtoo ah waxaa lagugu ganaaxi karaa, oo ay ku jiraan xayiraad lagu soo rogo xoriyadaada dhaqdhaqaaqaaga.**

## Maxaa keenaya in la igu xiro 'Xarunta Soo dhoweynta Dadka Shisheeye'? Sababtoo ah waxaa lasoo saaray go'aan xakameynaaya xuquuqdaada dhaqdhaqaaqa.

- Waxaa jiri kara dhowr sababood oo keeni kara in lagugu xiro Ježevo, Tovarnik ama Trilj.
- Sharciga Croatia wuxuu ogol yahay in la xiro codsadayaasha magangalyada caalamiga ah xaalado gaar ah, oo ay ku jiraan xaaladaha hoos ku qoran.
- Codsadayaasha codsanaaya magangalyo doonka ka dib marka la xiro inta lagu jiro hawsha ka masaafurinta Croatia waxay ku sii jiri karaan xabsiga inta lagu jiro nidaamka magangalyo doonka.
- Maamulka Croatia waxa kale oo laga yaabaa inay go'aansadaan inay xiraan codsade haddii ay aamminsan yihiin inay jirto khatar ah inuu baxsado (si sharci daro ah oga baxaan Croatia), tusaale ahaan haddii shakhsigu isku dayay inuu sidaas sameeyo marar badan oo hore, ka hor inta aan la dhamaystirin nidaamka magangalyo doonka ah.
- Codsadayaasha sidoo kale waa la xiri karaa haddii loo arko inay lagama maarmaan tahay si loo caddeeyo aqoonsigooda ama dhalashadooda, ama wax kasta oo kale oo xaqiiqo ah iyo xaaladaha codsigaagu ku saleysan yahay.
- Sidoo kale codsadayaasha waxaa loo xiri karaa sababo la xiriira amniga qaranka iyo ilaalinta nidaamka guud; ka hortagga faafitaanka cudurrada faafa, ama ka hortagga khatarta keeni karta dhimasho iyo dhuminta maal.
- Waxaad xaq u leedahay in aad racfaan u gudbiso Maxkamadda Maamulka, si ay Maxkamaddu dib ugu eegto in go'aanka lagugu xiray uu yahay mid sax ah marka loo eego sharciga Croatia. Sarkaalka ku ogeysiinaya go'aanka lagugu xiraayo ayaa sidoo kale ku siin doona liiska qareennada kuugu matali kara lacag la'aan caqabad kasta oo noocaas ah oo Maxkamadda hor yaala.



**Waxaad ka codsan kartaa sharaxaad faahfaahsan oo ku saabsan sababaha laguu xiray sarkaalka 'MUP' oo ku ogeysiiyay go'aanka xirista. Arrintaan sidoo kale waxay la xiriirtaa kiisaska kale ee xakameynaaya xoriyadaada dhaqdhaqaaqa ee lagu dulsaaray. Waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqulka go'aanka rasmiga ah ee ku saabsan xarigaaga ama xaddidaada xorriyadaada dhaqdhaqaaqa, iyo inaad ka xarayso racfaan ka dhan ah go'aanka Maxkamadda Maamulka.**

## Maxaa dhacaaya haddii aan helo go'aan diidmo oo aan wanaagsaneyn oo la xariira codsigayga magangalyo doonka? Racfaan ayaad ka qaadan kartaa.

- Go'aan kasta oo diidmo ah wuxuu ka koobnaan doonaa tilmaamo khuseeya muddada aad rafcaan uga gudbin karto Maxkamadda Maamulka, si aad u codsato in dib u eegis lagu sameeyo diidmada.
- Haddii aadan xarayn rafcaan ka dhan ah go'aanka diidmada, ama haddii racfaankaaga la diido, waa inaad iskaga baxdo Croatia. Haddii aadan ka bixin Croatia, waxaa lagu xiri karaa maadaama si shardi daro ah ku joogto, waxaana lagugu hayn doonaa 'Xarunta soo dhowaynta ajaaniibta', oo lagaaga masaafurin doono Croatia.



**Samee taxadar, waqtiyada kama dambeysta ah ee lagu xareynaayo racfaanka waa gaaban yihiin: isla markiiba tallaabo qaad oo dalbo kaalmo sharci.**

## Maxaa dhacaaya haddii la i siiyo magangalyo caalami ah?

- Waxaa lagu siin doontaa suurtagalnimada aad kusii joogeyso Croatia, waxaadna heli doontaa xuquuqo dheeraad ah.
- Xuquuqahaas waxay la xariiraan shaqada, daryeelka caafimaadka, waxbarashada, iyo aagag kale oo nolasha maalinlaha ah la xariira.



**Haddii lagu siiyo magangalyo caalami ah (magangalyo ama ilaalin kumeel gaar ah), waxaa lagu siin doonaa macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga, iyo sidoo kale buug yar oo sharaxaaya macluumaadka muhiimka ah ee nolosha Croatia, oo uu ku siinaayo sarkaal dhexgalka bulshada oo ka socda Wasaaradda Arrimaha Gudaha.**



# Halkee ka codsan karaa caawimaad dheeraad ah?

**Haddii aad u baahan tahay caawimaad ama macluumaad dheeraad ah oo la xariira habraaca lagu qeexay dukumiintigaan, waxaad la xariiri kartaa UNHCR ama ururo kale iyo machadyo ka shaqeeya ilaalinta magangalyo doonka iyo qaxootiyaasha, oo ay kujiraan:**

UNHCR (Xafiiska Wakiilka Sare ee Qarabada Midoobey ee qaabilsan Qaxootiyaasha)
Heinzelova 44, Zagreb
Taleefoonja: (00385) (01)37-13-555
Webseedka: https://help.unhcr.org/croatia/
Iimaylka: HRVZA@unhcr.org

HRVATSKI PRAVNI CENTAR (XARUNYA SHARCIGA EE CROATIAN)
Bednjanska 8a, Zagreb
Taleefoonja: (00385) (01) 48-73-965
Webseedka: www.hpc.hr
Iimaylka: hpc@hpc.hr

HRVATSKI CRVENI KRIŽ (URURKA LAAN QAYRTA CAS EE CROATIAN)
Ulica Crvenog križa 14/1, Zagreb
Taleefoonja: (00385) (01) 46-55-814
Webseedka: www.hck.hr
Iimaylka: azil-migracije@hck.hr

CENTAR ZA MIROVNE STUDIJE (XARUNTA DARAASADA AMNIGA)
Selska cesta 112a, Zagreb
Taleefoonja: (00385) (01) 48-20-094; (00385) (0) 91-330-0183
Webseedka: www.cms.hr
Iimaylka: cms@cms.hr

PRAVNA KLINIKA PRAVNOG FAKULTETA U ZAGREBU (RUGTA CAAFIMAADKA SHARCIGA EE KUULIYADA SHARCIGA EE JAAMACADA ZAGREB)
Palmotićeva ulica 30, Zagreb
Taleefoonja: (00385) (01) 48-11-311; (00385) (01)48-11-320; (00385) (01)48-11-324
Webseedka: klinika.pravo.hr
Iimaylka: klinika@pravo.hr

ISUSOVAČKA SLUŽBA ZA IZBJEGLICE (ADEEGGA QAXOOTIGA EE JESUIT)
Maksimirska cesta 286, 10000 Zagreb
Taleefoonja: (00385) (0)98-979-2298
Webseedka: hrv.jrs.net
Iimaylka: info@jrs.hr

PROJEKT GRAĐANSKIH PRAVA SISAK/MASHRUUCA XUQUUQAHA MADANIGTA AH EE SISAK (PGP/CRP SISAK)
S. i A. Radića 6/5 (2. floor right), 44000 Sisak
Taleefoonja: (00385) (44)571 752
Besplatni tel./free legal phone: 0800 200 098
Webseedka: www.crpsisak.hr
Iimaylka: pgp-sisak@crpsisak.hr

XADUUDAHA:MIDNA
Josipa Seissla 68, 10000 Zagreb
Lambarka WhatsApp.: (00385) (0)97 646 3819
Webseedka: https://www.facebook.com/bordersnone/
Iimaylka: hello@bordersnone.com

Xaashidaan waxaa la soo saaray iyadoo qayb ka ah mashruuca ‘Caawimaada Sharciga iyo Dhisida Awoodda Helitaanka Dhul iyo Magangalyada ee Croatia,’ oo ay maalgeliso UNHCR.